

Sida uu COVID-19 ugu faafo bulshooyinka

Dadka qaba COVID-19 oo dhan ma wada dareemaan inay bukaan. Iyagoo caafimaad qab dareemaya ayay dadka qaadiin karaan xanuunka.

Haddii qof qaba COVID-19 uu aado aroos, ama geeri, ama meel kale oo la iskugu yimid, waxa fudud sida uu qofkaasi xanuunka ugu faafin karo dadka kale ee goobtaas iskugu yimid. Waxa ayna arintani ugu daran tahay marka dadka isku yimid aanay maaskaro gashaynayn, iskuna jirsadaan in ka yar lix foodh.

Dadkii sidaa xanuunka ku qaaday markay ku laabtaan qoysaskoodii, asxaabtoodii iyo guryahoodii, waxa ay u gaynayaan xanuun, oo ay qaadiinayaan. Haddii ay magaalo kale ku nool yihiin, magaaladaa ayay gaynayaan xanuunka.

Qof kasta oo guriga kula nooli sidaas ayuu ku qaadi karaa xanuunka. Haddau dhamaantood shaqo iyo dugsi aadaan, ama meel kale oo la isku yimaado tagaana sidaas oo kale ayay xanuunka COVID-19 usii qaadiin karaan.

Wax ku bilaabmay hal qof oo qaba COVID-19 ayaa degdeg u noqon kara tobanaan iyo in ka badan haddii aan la qaadin talaabo lagu xakamaynayo faafitaanka xanuunka.

Qaad talaabooyin aad ku badbaadinayso qoyskaaga, asxaabtaada, iyo xataa dadka aanad aqoonta u lahayn.

Ha tagin meelaha dadku isugu yimaadaan

Gasho maaskaro

Ka fagow dadka kale ugu yaraan lix fuudh

Gacmaha dhaqo

Guriga joog haddii aad xanuusanayso

Minnesota Department of Health
Communications Office
PO Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
651-201-4989
health.communications@state.mn.us
www.health.state.mn.us

10/20/20 (Somali)

Si aad ugu hesho macluumaadkan qaab nooc kale ah, wac: 651-201-4989.